

BAARISTA COVID-19 WAXAAD KA OGAANEYSO

(COVID-19 TESTING WHAT TO KNOW)

Sababtee baad isu soo baareysaa?

Baaristu waa wax muhiim u ah in la yareeyo faafidda COVID-19. Marka la iska baaro COVID-19 waxaa la ogaanayaa haddii lagu qaadsiiyey xanuunka COVID-19 wakhtiga baarista ama wakhti ka sii horreeyey.

Waa kuwee noocyada baarista ah ee jira?

Baarista Faayruska, sida nooca molokuyuulka ama nooca dheecaanka, si loo ogaado in uu jiro xanuunka COVID-19. Baarista guriga ee ay dadku isku sameeyaan waa baarista faayruska. **Baarista dheecaanka difaaca** waxaa lagu ogaadaa haddii qof la soo qaadsiiyey COVID-19 mar hore. Hoos ka eego faahfaahinta baarista molokuyuulka, dheecaanka, difaaca jirka ama booqo www.dhs.wisconsin.gov/covid-19/testing.htm.

Baarista Faayruska

	Baarista Molokuyuulka	Baarista Difaaca Jirka	Baarista Qeybaha Difaaca
Maxay jawaabta baaristu sheegi doontaa?	Infakshanka hadda ee COVID-19.	Infakshanka hadda ee COVID-19.	Infakshan hore oo ah COVID-19. Tallaalka COVID-19 ayaa mararka qaar la arkayaa difaaca lagu sameystay.
Magacyada kale ee baarista?	Baarista xanuun-helidda, baarista RT-PCR ama PCR, asalka baarista faayruska ee bu'da unugyada (NAAT), baarista LAMP.	Baaris qalab oo degdeg ah, baarista waraaqda, baaris ah hab geesgees.	Baarista dheecaanka, baarista dhiigga, baaris dheecaan.
Sidee baa dhiigga la isaga soo qaadayaa?	Suufka sanmariska ama dheecaanka cunaha; ama qaadista candhuufta.	Dheecaanka la qaado cunaha.	Dhiig-qaadis.
Jawaabtu muddo intee le'eg ayey qaadaneysaa?	Jawaabtu waxay badanaa qaadataa 1 ilaa 3 maalmood. Waa wax qaadan kara muddo gaaban ama muddo dheer oo goobta baarista ayey ku xiran thay.	Wax saacad ka yar.	Jawaabtu waxay qaadaneysaa hal saac iyo 1 ilaa 3 maalmood oo goobta baarista ayey ku xiran thay.
Waa maxay dhibaatooyinka dhici kara?	Mararka qaarkood dhowr maalmood ayey qaadan kartaa in jawaab la helo.	Khalad ayaa dhici kara iyo jawaab aan sax ahayn. Jawaabaha dadka aan calaamadaha qabin ayaan la rumeysan karin.	Laguma ogaanayo infakshan hadda jira ama difaac laga haysto COVID-19. Waxay ku xiran tahay nooca baarista aad isku sameyso, waxaa kugu dhici kara xanuunka ka dib markaad qaadato tallaalka COVID-19.
Baaris kale miyaa loo baahan yahay?	Markaas ka dib in lagu baaro badanaa ma aha wax muhiim ah.	Markaas ka dib in lagu baaro ayaa muhiim ah. Kala hadal dhakhtarkaaga ama xafiiska caafimaadka dadweynaha si loo go'aamiyo haddii ay muhiim kuu tahay baaris dheeraad ah.	Markaas ka dib in lagu baaro ayaa badanaa muhiim ah.

